

## Barnaamij waxbarasho gaar ahaaneed

- Casharada barashada luuqadda waxaa lagu saleeyey baahida iyo qasadka qofka wax baranaya.
- Baruhu wuxuu xoogga saari karaa nooc kasta oo luuqadda qaybaheeda ka mid ah, ha noqoto oraahyada Niyusiilaan u gaarka ah ama naxwaha afka Ingiriiska.
- Waxbarashada hoyga waxaa ku jira hawlo fal-gacmeed (baraatiko) ah sida isu diyaarin qaadashada laysinka baabuurta ama ballan qabsasho.
- Barayaashu waxay qalabka wax barista ka xushaan kaydka adeegga Home Tutorka, sida cajaladaha la dhegeysto, buugaag, sawirro iyo xaashiyaha wax laga barto.
- Barayaasha waxaa lagu dhiirrigeliyaa inay kobciyaan kalsoonida kuwa wax baranaya si ay furasado kale oo waxbaraho u bilaabaan.



ESOL:Ingriiska dadka ku hadla afafka kale

Miyaad nala soo xiriiri...

### Ardada cusub

Fadlan nasoo wac ama xafiiska nagusoo booqo, ama qof saaxiibkaa ah ama qaraabadaada ah ayaa sidaasi kuu samayn kara. Isku duwaha ayaa ardada cusub is arag la yeelan doona si loo ogaado baahidooda looguna raadiyo qof guriga wax ku bara. Faahfaahintu waa sidan hoos ku xusan.

### Barayaal cusub waan soo dhowaynaynaa!

Haddaad danaynayso in laguu tababaro si aad u noqoto qof waqtigiisa ugu tabaruca inuu dadka hoygooda wax ku baro, fadlan nala soo xiriir.

Barayaasha waxaa looga baahan yahay:

- ✳ Inay si fiican af-Ingiriiska ugu hadlaan una qori karaan
- ✳ Inay ku deeqaan dhowr saacadood toddobaadkii
- ✳ Inay si wanaagsan xiriir ula samayn karaan dad dhaqammo kala duwan kasoo jeeda iyo kuwo durufo kala duwan leh

[www.esolht.org.nz](http://www.esolht.org.nz)



## Ma fududa in nolol cusub halkan laga bilaabo

Somali



## Gaar ahaan haddaad tahay qof aan af Ingriiska ku hadlin



# Halkaan ayaad caawimaad ka heli kartaa

## Adeegga ESOL ee dadka hoygooda wax lagu baro

Waxaan nahay hay'ad bulsheed oo ka caawisa qaxootiga iyo dadka kale ee waddanka soo dega barashada af-Ingiriiska iyo inay nolol cusub Niyuusiilaan ka bilaabaan.

## Qofkee ayaa Ingiriiska naga baran kara?

Qof kasta oo qaan gaar ah oo kasoo jeeda dadka aan af-Ingiriiska ku hadlin oo Niyuusiilaan u yimid inuu ku noolaado, una baahan in laga caawiyo barashada afka Ingiriiska iyo inuu ku dhex noolaado bulshada.

Qaar badan oo dadkaas ka mid ahi horay ayay dalalkoodii af-Ingiriiska ugu soo dhigteen, waxayna doonayaan inay sii horumariyaan aqoontooda luuqadda si ay shaqo u helaan iyo si ay saaxiibbo u samaystaan. Qaar kalena ku hadalka Ingiriisku waa arrin ku cusub oon u sahlanaayn.

Macallimiinteennu arrintan way u fududaynayaan iyagoo ka caawinaya barashada luuqadda isla markaana saaxiibtinimo usoo bandhigaya.



## Waa kuwama barayaasheenna hoygu?

Tabarucayaal (folanteer) qaangaar ah oo bulshada ka mid ah ayaa u tababarta si ay u noqdaan barayaal lashaqeeya barnaamijka ESOL Home Tutor ka degaankooda. Baruhu wuxuu ka caawiyaa qofka ardayga ah luuqadda Ingiriiska iyo inuu dareemo inuu ka mid yahay bulshadiisa cusub.

Folanteerku waxay qaataan tababar si loogu diyaariyo inay dadka af-Ingiriiska baraan. Tababarka waxaa ka mid ah casharro ku saabsan feejignaanta dhaqammada, baahida iyo hababka kala duwan ee dadku wax u bartaan, iyo inay dadka ka caawiyaan Ingiriiska looga baahan yahay nololsha maalin walba.

Toddobaad walba in ka badan 2500 oo qof ayay barayaasheennu caawiyaan. Baruhu wuxuu qofka gurigiisa kusiiyaa cashar toddobaadle ah.

## Faa'iidooyinka barnaamijka 'home tutor'

Barayaashu waxay gacan ka geysan karaan meesha aan lahayn fasallo luuqadda lagu barto ama aan ku habboonayn qofka wax baranaya.

Jawi waxbarasho oo ku habboon ayaan u diyaarinay dadka aan horay usoo marin waxbarasho rasmi ah.

Barashadu waa mid debacsan. Waqtiyada casharrada waxaa lagu saleeyey duruufaha qoys iyo kuwa shaqo ee ardayga iyo macallinka.

Si dabiici ah ayaa saaxiibtinimada u dhaxysa ardayga iyo macallinka u kobacdaa, waxayna keeni kartaa dhaqan isweydaarsi mira dhaliya.

Barnaamijka home tutorku wuxuu sameeyaa dadaal lagu horumarinayo waxbarashada iyo ka helitaanka nololsha Niyuusiilaan.

- Kooxo bulsheed oo af-Ingiriiska ku wada sheekayta
- Fasallo lagu barto akhriska iyo qoraalka
- Kooxo dan gaar ah wadaaga
- Booqasho meelo xiiso leh
- Dhaqamada oo loogu dabbaal dego si wada jir ah
- Fursado madadaalo
- Warsidayaal (jaraa'id).



Luuqadda Ingiriiska iyo taakulo wax ku ool ah ee dejinta (qaxootiga)

